

# Morningside Acres Cleanup Site



Goobta Morningside Acres site

## Faalooyinka waa la aqbalay

Oktoobar 7, 12:00 am –  
Nofeembar 7, 11:59 pm, 2024

## Soo gudbi faalooyinka

**Khadka onlayka ah:**

[www.go.ecology.wa.gov/  
MorningsideAcresComments](http://www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcresComments)

**Boosta ahaan ama i-meel ahaan ku socoto:**

Zak Wall, Site Manager  
WA Department of Ecology  
PO Box 330316  
Shoreline, WA 98133-9716  
425-758-5231  
[Zak.Wall@ecy.wa.gov](mailto:Zak.Wall@ecy.wa.gov)

## Goobaha dib u eegida dhukumiintiga

[www.go.ecology.wa.gov/  
MorningsideAcres](http://www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres)

Seattle Public Library  
Columbia Branch  
4721 Rainier Ave S  
Seattle, WA 98118

## Macluumaadka goobta

Aqoonsiga Goobta Xarunta: 4321  
Aqoonsiga Goobta Nadiifinta: 12408

## Xiriirka Wacyi-gelinta Dadweynaha

Kristen Forkeutis,  
Khabiirka Wacyi-gelinta  
[Kristen.Forkeutis@ecy.wa.gov](mailto:Kristen.Forkeutis@ecy.wa.gov)  
425-240-4353

## Dhukumiintiga aya diyaar u ah fikradaha iyo faalooyinka dadweynaha

The Department of Ecology (Ecology) waxay kormeeraysaa nadiifinta Morningside Acres Site (Goobta) ee xaafadda Columbia City ee Koonfurta Seattle. Hormarka Waxtarka leh ee SouthEast (SouthEast Effective Development, SEED), oo ah shirkad horumarin ahaaneed oo aan macaash doon ahayn oo ku taala Koonfurta Seattle, ayaa nadiifinaysa goobtan. Waxaan kugu casuumaynaa inaad faalo ka bixiso dhukumiintiyada soo socda:

**Wareegtada Ogolaanshaha Iibashada (Prospective Purchaser Consent Decree, PPCD):** heshiis sharci ah oo faraya iibsadaha (yaasha) inay ka hirgeliyaan nadiifinta goobta oo siisa iibsadaha (yaasha) bixinta maaliyadeed.

**Qorshaha Ka Qaybqaadashada Dadweyne:** dhukumuunti sharaxaya sida dadku uga qayb qaadan karaan habka nadiifinta.

## Su'aalaha? Nagu soo biir bandhiga furan!

Soo xaadir bandhiga furan ee labada saacadood ah ee lagaga hadlayo nadiifinta goobtan. Turjumaada telefoonka ayaa lagu heli karaa Luuqada Shiinaha, Fiitnaamiis, Isbaanish, Soomaali, Amxaari, iyo Carabi. Dhamaan da'aha waa la soo dhawaynayaa!

**Talaado, Oktoobar 22, 2024**  
5:30 galabnimo-7:30 habeenino

**Si shakhsi ahaaneed:** L.E.M.S Bookstore  
5023 Rainier Ave S, Seattle  
*Cunto fudud ayaa la bixin doonaa!*

**Khadka Onlaynka ah:** Isdiwaangali oo kusoo biir Zoomka: [www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres](http://www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres)



中文 | Tiếng Việt | Español | Soomaali | አማርኛ | العربية

**Taariikhda Goobta**

SouthEast Effective Development (SEED) waa urur aan macaash doon ahayn ee horumarinta bulshada oo diirada saaraya horumarinta dhaqaalaha iyo caafimaadka dhaqanka Koonfur bari Seattle ilaa 1975. “Himilada SEED waa in la horumariyo tayada noloshaha ee Koonfur-bari Seattle iyada oo abuuraysa iskaashi iyo dhiirigalin maalgashi xaga guriyaynta, farshaxanka, iyo horumarinta dhaqaalaha – iyada oo si gaar ah diiradda loo saarayo dadka dergaanka ah fursadaha iyo kheyraadka yar.”<sup>1</sup>

SEED waxay dib u horumarin doontaa Goobta, oo ku taal 5001, 5015, iyo 5121 Rainier Avenue South, waxayna u badali doontaa dhismo waxyaabo kala duwan loo isticmaalo. Waxay ka koobnaan doontaa guryo la awoodi karo qiimo ahaan iyo goobo ganacsi, iyada oo goobta wasakhaysan u badali doonta xarun horumar dhaqaale oo firfircoon leh. Mashruucu wuxuu bixin doonaa dhismo cusub oo guri dabaq ah oo qoysas badan ku noolaan doonaa oo leh ku dhawaad 100 guri, kaas oo diirada lagu saarayo ka hortaga barakaca iyo in la awoodi karo qiimo ahaan. Soo bandhiga waxaa kamid ah:

- 100% guryo kiro ah oo la awoodi karo oo lagu beegsanayo in ka yar 60% dakhliga dhexdhexaadka ah (Area Median Income, AMI)
- Isku dhafka dabaq ah hal qof oo kaliya, hal qol iyo fadhi, laba qol iyo fadhi, iyo guri dabaq ah oo sadex qol iyo fadhi ah
- Jazz Night School (JNS) iyo Life Enrichment Bookstore (LEMS) ayaa yeelan doona mulkiyada dabaqa dhulka ah



Muuqaalka laga qaaday hawada sare ee goobta



Dukaanka ku haboon goobta oo ku sii yaalay 5015 Rainier Ave S



Xarun hore ee hawlaha dayactirka baabuurta 5021 Rainier Ave S

Baahida loo qabo PPCD ee goobtan waxay ka timaadaa isticmaalka taariikhiga ah ee guriga. Daanta Waqooyi (5001 Rainier Ave S), Daanta Dhexe (5015 Rainier Ave S), iyo Daanta Koonfureed (5021 Rainier Ave S) ee Goobta waxay leeyihiin taariikho kala duwan. Daanta Waqooyi waxa loo isticmaalay ugu yaraan laba jiil oo kaalmaha shidaalka laga soo bilaabo 1927 ilaa horaantii 1970-meeyadii. Daanta Dhexe waxa loo isticmaalay sidii xafiis alwaax ah qiyaastii 1926 ilaa 1965, xafiiska wakiilka caymiska 1966 ilaa 1980, iyo dukaan laga bilaabo 1980 ilaa hada. Daanta Koonfureed waxaa loo isticmaali jiray, wakhtiyo kala duwan, goob dayactir iyo dib u habaynta baabuur, ka ganacsiga baabuurta iyo doomaha, ka ganacsiga alaabta tuubooyinka, barkada dabaasha, xarunta jimicsiga, iyo dukaanka buugaagta, kaas oo ah kiraystaha hadda. Hawlahan hore ee goobta ayaa waxay u sababeen goobaha batroolka iyo chlorin wasakheeya ee carada iyo biyaha dhulka hoostiisa ku jira, taas oo lagu go'aamin doono inta ay le'eg tahay baaritaanka sixitaanka..

<sup>1</sup> Seattle SouthEast Effective Development (SEED), 2024, <https://www.seedseattle.org/about-us/>

## Hormarka goobta nadiifinta

Laga soo bilaabo 2005, baaritaanada deegaanka iyo dadaalada nadiifinta ayaa laga sameeyay goobta si loo fahmo loona qeexo baaxada wasakhaynta. Midan waxaa kamid ah sambal ciida iyo biyaha dhulka hoostiisa, sambal laga qaado hawada gudaha iyo dibada, iyo sahanka qalabka dhismaha ee khatarta ah. Goobta waxaa laga diwaangaliyay [Barnaamijka Nadiifinta Mutadhawacnimo](#)<sup>2</sup> (Voluntary Cleanup Program, VCP) ee WA Dept of Ecology Oktoobar 25, 2022. Tan iyo markaas, mulkiiluhu wuxuu sii waday dadaalkiisa si uu u tilmaamo goobta oo uu u horumariyo habraaca nadiifinta ee bilowga ah.

Marka SEED ay gasho PPCD oo ay hesho mulkiyada Goobta, waxay mas'uul ka noqon doonaan nadiifinta goobta iyadoo si toos ah ay u kormeerayso Ecology.

## Wasakhda

Baaritaano hore ayaa lagu xaqiijiyay jiritaanka wasakhawga carada, gaaska carada ku daatay, iyo biyaha dhulka hoostiisa ee Goobta (ka eeg khariirada goobta oo ku yaala boga afraad). Wasakhdu waxay la xiriirtaa dayactirka baabuurta taariikhiga ah iyo xarumaha dhaqitaanka ee daanta Koonfurta, kaalinta hore ee shidaalka ee Daanta Waqooyiga, iyo haamaha kaydinta dhulka hoostiisa ee taariikhiga ah ee Koonfurta iyo Daanta Waqooyiga ee la xiriira ganacsiyadaas. Wasakhda la og yahay waxaa kamid ah:

- Alaabaha Dabiiciga ah ee Uumiga Leh ee Chlorin ku Jirto (Chlorinated Volatile Organic Compound, CVOC)
- Wadarta Kiimikada ku Jirta Saliida (Total petroleum hydrocarbons, TPH)
- Kiimikada ku Jirta Shidaalka (Volatile Petroleum Hydrocarbons, VPH)

Wasakhayntan ayaa lagu ogaaday xadi ka sarreya heerarka nadiifinta gobolka, oo lagu qeexay [Xeerka Habraaca Xakamaynta Wasakhda \(Model Toxics Control Act, MTCA\)](#).<sup>3</sup> MTCA waa sharciga nadiifinta deegaanka ee Washington, waxayna u baahan tahay in wasakhda la nadiifiyo.

## Maxay goobtani muhiim u tahay

Washington waxay aad ugu baahan tahay guryo la awoodi karo oo gobolka oo dhan ah. Wasakhawga, ama xitaa shakiga wasakhda, ayaa kor u qaada qiimaha horumarinta guriyaynta. Qiimaha sare kumadhiirigelinayo dadka dhisa dhismooyin si ay u dhistaan guryo la awoodi karo qiimo ahaan.

Marka lagu daro khataraha caadiga ah ee dib u dhiska, nadiifinta meelaha wasakhaysan waxay noqon kartaa hannaan adag oo leh khatar aad u badan. Qiimaha iyo wakhtiga la xiriira nadiifinta goobta ayaa inta badan si aan muhiimad la siinayn loo fahmay; Natijjo ahaan, goobo badan ayaa banaan ama aan la isticmaalin sanado, xitaa tobanaan sano. Taageeritaanka nadiifinta guryaha ee qiimo ahaan la awoodi karo waxay ka caawisaa hubinta in nadiifinta la sameeyo iyadoo la ilaalinayo caafimaadka bulshada iyo deegaanka.

SEED waxay codsatay maalgalinta Ecology ee [Barnaamijka Deeqda Nadiifinta Guryaha Qiimo ahaan la Awoodi Karo \(Affordable Housing Cleanup Grant Program, AHCGP\)](#),<sup>4</sup> Kaas oo ka caawin kara horumarinta nadaafadda deegaanka ee horumarinta guryaha la awoodi karo qiimo ahaan. Deeqahani waxa ay dabooli karaan kharashyada wax ka qabashada, oo ay ku jiraan qorshaynta, baaritaanka, iyo shaqada farsamada ee loo baahan yahay si loo nadiifiyo goobaha wasakhaysan. Ujeedada AHCGP waa in la dadajiyo nadiifinta iyo dib u cusboonaysiinta goobaha wasakhaysan ee guryaha la awoodi karo lana yareeyo saamaynta kharashyada nadiifinta.

<sup>2</sup> <https://ecology.wa.gov/Spills-Cleanup/Contamination-cleanup/Voluntary-Cleanup-Program>

<sup>3</sup> <https://ecology.wa.gov/mtca>

<sup>4</sup> <https://ecology.wa.gov/About-us/Payments-contracts-grants/Grants-loans/Find-a-grant-or-loan/Affordable-Housing-Cleanup-grants>



Nadiifinta goobta wasakhaysan iyo astaamaha dhismo taariikhi ah hadda iyo taariikhda  
Laga soo xigtay: Final Remedial Investigation and Feasibility Study Report and Draft Cleanup Action Plan (Figure 2, p. 74), Nov 14, 2023, Farallon Consulting.

### Maxaa dhacaya marka xiga?

Ecology waxay tixgelin doontaa dhammaan faalooyinka la helo waxayna wax ka badeli kartaa dukumentiyada iyadoo lagu saleynayo faallooyinkaaga. Intaa kadib, PPCD iyo Qorshaha Ka qaybgalka Dadweynaha ayaa la dhammaystiri doonaa, nadiifinta rasmiga ahna waa la bilaabi doonaa. Baaritaanka Sixitaanka iyo Daraasada Suurtogalnimada ayaa markaa la dhammaystiri doonaa. Natijoooyinka ka soo baxa Baadhista Sixitaanka iyo Daraasada Suurtogalnimada waxay horseedi doontaa Qorshe Hawleedka Nadiifinta. Baaritaanka Sixitaanka iyo Daraasadda Suurto-galka ah qabyada ah iyo sidoo kale Qorshe hawsha Nadiifinta ayaa diyaar u ah fikrad ka dhiibashada iyo faallooyin dadweyne.

### Habraaca nadiifinta Ecology

MTCA waa sharciga nadiifinta deegaanka ee Washington. Waxay bixisaa shuruudaha nadiifinta goobta wasakhaysan waxayna dejisaa heerar ilaalinaya caafimaadka aadanaha iyo deegaanka. Ecology waxay ku dhaqantaa MTCA waxayna kormeertaa nadiifinta. [Habraaca Nadiifinta MTCA](#)<sup>5</sup> ayaa loo dhameeyay isagoo ah talaabooyin (eeg garaafyada hoose) iyadoo la eegayo jadwalka isbadalka.



Habraaca rasmiga ah ee nadiifinta Washington

**有關清理工作的中文信息** 中文资讯如需查看本文件的中文普通话译本，请访问

[www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres](http://www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres) , 访问 Seattle Public Library 的 Columbia 分馆 (地址: 4721 Rainier Ave S, Seattle, WA 98118 ) , 或拨打 425-240-4353 并稍等口译员加入通话。

**Thông tin bằng tiếng Việt** Để có bản dịch của tài liệu này bằng tiếng Việt, hãy truy cập

[www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres](http://www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres), đến Seattle Public Library, Chi Nhánh Columbia (4721 Rainier Ave S, Seattle, WA 98118) hoặc liên hệ số 425-240-4353 và đợi thông dịch viên tham gia cuộc gọi.

**Información en español** Para obtener una traducción al español de este documento, vaya a

[www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres](http://www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres), visite la Seattle Public Library Columbia Branch (4721 Rainier Ave S, Seattle, WA 98118) o llame al 425-240-4353 y espere a que un intérprete se una a la llamada.

**Macluumad Soomaali ku Qoran** U turjumida dhukumiintigan Soomaali, booqo

[www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres](http://www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres), booqo Seattle Public Library Columbia Branch (4721 Rainier Ave S, Seattle, WA 98118), ama soo wac 425-240-4353 oo sug inuu turjubaan kusoo biiro wacitaanka.

**መረጃ በአማርኛ** ይህን ሰነድ በአማርኛ ትርጉም ለማግኘት ወደ [www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres](http://www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres) ይሂዱ እና የSeattle Public Library Columbia ቅርንጫፍን ይጎብኙ (4721 Rainier Ave S, Seattle, WA 98118)፣ ወይም በ 425-240-4353 ይደውሉ እና አስተርጓሚ ጥሪውን እስኪቀላቀል ድረስ ይጠብቁ።

المعلومات باللغة العربية للحصول على ترجمة لهذه الوثيقة باللغة العربية، انتقل إلى [www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres](http://www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres)، أو تفضل بزيارة فرع مكتبة (Seattle Public Library Columbia (4721 Rainier Ave S, Seattle, WA 98118)، أو اتصل على الرقم التالي: 425-240-4353 وانتظر حتى ينضم مترجم فوري إلى المكالمة.

<sup>5</sup> <https://ecology.wa.gov/mtca-process>

Toxics Cleanup Program  
PO Box 330316  
Shoreline, WA 98133

## Morningside Acres Cleanup Site

Dhukumiintiga aya diyaar u ah fikradaha iyo faalooyinka dadweynaha

中文 (第 5 页) | Tiếng Việt (trang 5) | Español (pág. 5)

Soomaali (p. 5) | አማርኛ (p. 5) | اللغة العربية (ص. 5)

Mudada faalo ka dhiibashada dadweynaga

Oktoobar 7, 12:00 habeenimo – Noofeembar 7, 11:59 habeenimo, 2024

[www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcresComments](http://www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcresComments)

Bandhig Furan (si qof ahaan iyo khadka onlayn ka)

Talaado, Oktoobar 22, 2024

5:30 galabnimo – 7:30 habeenimo

[www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres](http://www.go.ecology.wa.gov/MorningsideAcres)

### Helitaanka ADA

Si aad u codsato habaynta adeegyada Sharciga Dadka Maraykanka ee Naafada ah (Americans with Disabilities Act, ADA), kala xiriir Ecology taleefoonka 425-240-4353, iimayl u dir [kristen.forkeutis@ecy.wa.gov](mailto:kristen.forkeutis@ecy.wa.gov), ama booqo [ecology.wa.gov/Accessibility](http://ecology.wa.gov/Accessibility). Adeegyada Dadka Maqalka Naafada ka ah ama TTY wac 711 ama 877-833-6341.



Muuqaalka laga qaaday hawada saree ee goobta